Title Page: Xafiiska Bulshada & Nolosha Dadweynaha ee MAGAALADA PORTLAND

Page 1: “Xafiiska Bulshada & Nolosha Dadweynuhu waa albaabta laga galo ee furaha u ah ka qayb qaadashada bulshada iyo magaalada.” –GUDDOOMIYAHA EUDALY

Page 2: XAFIISKA BULSHADA & NOLOSHA DADWEYNUHU wuxuu dadka reer Portland ku xiraa dowladda hoose si loo dhiirigeliyo wanaaga guud. Barnaamijkeenu wuxuu abuuraa dhaqan wada shaqeyneed, ballaarinta fursadaha loogu talagalay dadka reer Portland oo dhan si ay dadka u siiyaan aqoontooda, khibradooda, iyo hal-abuurnimadooda si loo xalliyo dhibaatooyinka degaanka isla markaana loo wanaajiyo nolosha magaaladeena aynu wadaagno.

Page 3: Waxaanu aanu aaminsanahay ee ah Hal magaalo, marka la eego kuwo badan oo bulshada ka mid ah Portland waxay hoy u tahay bulsho kala duwan oo leh khibrado gaar ah iyo nolol isku xiran. Isku keenida aragtiyaha kala duwan si loo ogeysiiyo go'aan gaarida dhanka degaanka ee magaaladeena awooda u siinaya siyaabo waxyar u leh qof kasta. Awoodda loogu talagalay ama ay leeyihiin Dadka reer Portland ee leh rabitaanka iyo fikraddo si wax looga qabto dhibaatooyinka saameeya bulshadooda gaarka ah. Taageerada laga helo iyo iskaashiga lala leeyahay dowladda hoose wuxuu abuuraa fursaddo cusub oo loogu talagalay ka qayb qaadashada iyo dhiirigelinta dad dheeraad ah si gacan looga geysto u horseedida in hore loo socdo. Abuurista mustaqbalkeena si wadajir ah Tallaabadeena maanta waxay qaabeyn doonaa magaaladeena barito. Waa muhiim in aan ka jawaabno fursadaha uu abuuray kobaceenu, kororka dadka kala duwan ee hadda iyada oo wax laga baranayo waayo-aragnimada dadka degaanka iyo kuwa caalamiga ah ee goobtan muddo dheer ka dhigay gurigooda.

Page 4: HAWSHEENU WELI WAA SIDEEDII HORE:
Dhiirigelinta dhaqanka ka qayb qaadashada bulshada: Waxaanu ka shaqeynaa in aanu ka qayb qaadano isla markaana taageerno xubnaha bulshada ka tirsan marka la sameynayo wax kala doorasho wadajir ah oo qaabeynaya nolosheena.

iyada oo la isku xirayo isla markaana la taageerayo dadka reer Portland oo dhan: Waxaan aqoonsanahay in dadka reer Portland ay siyaabo kala duwan isku habeeyaan, waxaanan halkan u joognaa in aan taageerno qof walba.

iyada oo si wadajir ah loo wada shaqeynayo iyo iyada oo lala shaqeynayo dowladda: Waxaan u shaqeynaa meel wax isku xirta ahaan, oo fududeynayna fahamka iyo iskaashiga ka dhaxeeya bulshada iyo dawladdooda hoose.

si loo dhiso xaafaddo iyo bulsho loo wada dhan yahay, badbaado leh isla markaana lagu noolaan karo: Baraamijyadeena waxaa loogu talagalay in lagu abuuro magaalo tayo sare oo nololeed u leh qof kasta oo ku nool, ka shaqeeya, ama ku ciyaaro halkan.

Page 5: Dhisidda Bulshada ee Barmaamijka Tallaabada Rosewood

Page 6: Ka qayb qaatayaasha Barnaamijka Awooda Naafanimo “Disability Power PDX” ee 2018 ee xafladda qalin jabinta

Page 7: Xafiiska Bulshada & Barnaamijyada Nolosha Dadweynaha

•Maamulka •Isgaarsiinta

- Macluumaadka & Gudbinta
- Maandooriyaha
- Ka hortagga Dembiyada • Barnaamijka Xaafadda
- Qorshe Hawleedka Bariga Portland • Xafiiska Xaafadda Bariga Portland • Adeegyada Xaafadaha Waqooyiga Portland
- • Ka qayb qaadashada Dadweynaha Magaalada oo Dhan • Barnaamijka Naafadda • Barnaamij Kala duwaanshaha iyo Hoggaaminta Bulshada • Caafimaadka Dhimirka • Barnaamijyada Reer Portland ee Cusub • Dadka Portland ee U Midoobay La Dagaalanka Nacaybka • Guddiga Dhallinyarada
- • Derbi ku sawirka 'Graffiti' • Ruqsadda Khamriga • Buuqa

Page 8: Hadafyada muddada-dheer

10-ka sano ee soo socda, xafiiska wuxuu ka shaqeyn doonaa saddexda hadaf oo muuqaal weyn leh.

Qaabab loo dhan yahay

Xafiiska Bulshada & Barnaamijyada Nolosha Dadweynaha wuxuu dhisi doonaa in laga mid noqdo hawl maalmeedyadeena, dejinta isbedelka ballaaran ee ka socda dowladda hoose oo dhan. Tani waxay u baahan tahay in si firfircoon loo tixgeliyo talo la helo iyo saameyn ay ku yeelata bulshada kala duwan ee ku nool Portland. Waxay sidoo kale u baahan tahay xoojinta iskaashiga la leeyahay iyo maalgelinta kooxda bulshada-ku saleysan ee matala sawrika guud ee dadka reer Portland. TUSAALOOYINKA HEERKA U GAARAY BARNAAMIJKA 3-SANO AH: •

- Hawlaha Ganacsiga iyo Maamulka: Wuxuu taageeraa siyaabaha badan ee bulshadu u doonayso in in ay uga qayb qaadato tiknoolajiyada digital-ka.
- Barnaamijka Maandooriyaha: Wuxuu maalgeliyaa isla markaana fududeeyaa qeybinta dhaqaalaha loogu talagalay nadiifinta diiwaanka, diiwaan ka saarista iyo horumarinta goobta shaqada.
- Xafiiska Xaafadda Bariga Portland: Hagaajinta dhismaha bulshada iyo ka qayb qaadashada bulshada ee kaabayaasha si loo kordhiyo iskaashiga loogu adeegayo Dadka Bariga Portland qiyaastii boqolkiiba 20% sanadkiiba

Page 9: La qabsiga Maamulka

Xafiiska Bulshada & Barnaamijyada Nolosha Dadweynuhu wuxuu si wadajir ah iskugu keeni doonaa bulshada kala duwan si wax looga qabto walwalka iyo dhibaatooyinka la wadaago ee saameynaya dhammaan dadka reer Portland oo dhan. Waxaan sidoo kale raadin doonaa siyaabo badan oo loola shaqeyn karo xafiisyada magaalada, keenista awooda khayraadkeena iyo khibradeena koox ahaaneed si loo gaaro hadafyada la wadaago iyo tallaabooyinka magaalada oo dhan.

TUSAALOOYINKA HEERKA U GAARAY BARNAAMIJKA 3-SANO AH:

- Xarunta Ka qayb qaadashada Bulshada iyo Xaafadda, Tayada Nololeed, iyo Ka hortagga Dembiyada: Saddexdan barnaamij waxay ka wada shaqeyn doonaan ballaarinta baaxadda iskaashiga bulshada iyo hay'adda si loo dejiyo hab dhammeystiran oo ku aadan badbaadada bulshada, tayada nololeed, iyo adkeysiga.
- La fuliyay isla markaana la awoodsiiyay Dadka Portland

Xafiisku wuxuu xoojin doonaa dhaqanka Portland ee ka qayb qaadashada bulshada wuxuuna abuuri doonaa jawi ay dadka reer Portland oo dhan ay ku dareemaan dhiirigelinta in ay wax gacan kaga geystaan. Waxaanu maalgelin doonaa kheyraad ku dhisan bulshada kala duwan ee magaalada ka jira anaga oo hubin doona in dad badan oo ku nool Portland ay arkaan khibradooda, walwalkooda, iyo rabitaankood oo ka dhex muuqda barnaamijyada ay magaaladu taageerto.

TUSAALOOYINKA HEERKA U GAARAY BARNAAMIJKA 3-SANO AH:

- Macluumaadka iyo Gudbinta: Hirgelinta nidaamka gudbinta adeega ee magaalada oo dhan, so ay dadka reer Portland si fudud oo wax ku ool ah ugu heli karaan macluumaadka iyo adeegyada magaalada.
- Adeegyada Xaafadaha Waqooyiga Portland: Horumarinta ilaha aan dowliga ahayn ee maalgelinta barnaamijyada bulshada ku saleysan.

Page 10: Magaceena iyo sababta uu muhiimka u yahay

Muxuu magaca cusubi ka dhigan yahay?

Xafiiska Bulshada & Nolosha Dadweynuhu wuxuu tilmaamayaa sababta aan u noqoneyno: waayo-aragnimada la xiriirta ku noolaanshaha Portland. Waxaan dooranay erayga Bulshada si loogu daro dadka reer Portland oo dhan, iyada oo erayga Bulsho uu yahay in uu muujiyo doorkayaga aan ka qaadanayno dadweynaha marka la eego dowladda hoose.

Waa maxay nidaamka horseeday magaca cusub? Ila soo bilaabo Janaayo -Febraayo 2018, waxaan wareysiyo ka qaadnay dad war bixiya oo muhiim ah, waxaan dirnay ra'yi ururin dadweyne, waxaanan xubnaha ka tirsan dadweynaha iyo shaqaalaha ku martiqaadnay in ay ka qayb qaataan wada hadal ku saleysan talo dhiibasho. Dadaaladani waxaa loogu talagalay in lagu helo tilmaan iyo in la fahmo sababta xafiiskayagu uu muhiimka ugu yahay xubnaha bulshada ka tirsan oo kala duwan, iyada oo aan la eegayn sida ay isku abaabulaan ama isku aqoonsadoon. Faahfaahinta nidaamkayaga dib isku shaac bixinta oo buuxa waxaa laga heli karaa website-kayaga.

Sidee baan isku bedelnay?

Xafiisku markii hore la aasaasay 1974, si uu u noqdo hab loogu talagalay in ururada xaafaddu kaga qayb qaataan nidaamka go'aan qaadashada ee dowladda hoose. Tan iyo markaa barnaamijyada xafiiskeena iyo xiriirka lala leeyahay dadweynaha ayaa horumar sameeyay. 2018, waxaan bedelnay magacayaga si aan si fiican uga turjuno shaqada aan qabano, siyaabaha aan u taageerno, iyo sida aan ula shaqeyno dadka reer Portland oo dhan iyada oo la adeegsanayo barnaamijyadayada kala duwan, ee hadana isku xiran. Waxaanu iskaashi la yeelanay bulshada iyo hay'adaha kale ee dowladda hoose si wax looga qabto walwalka degaanku qabo isla markaana loo horumariyo tayada nololeed ee Portland.

Page 12: Hoggaamiyaha bulshada ee Ricardo Varela and Guddoomiyaha Dhallinyarada ee Yesenia Ramos Pacheco ayaa iyaga oo taageeraya wakiilnimada sharciga ee caalamiga ah ka markhaati furay Guddiga Magaalada (Maarso 2018)

Page 13: Dhiirigelinta wanaaga guud

Back page: Xafiiska Bulshada & Barnaamijyada Nolosha Dadweynaha